Tallaalada COVID-19 ee Daryeelka Caruurta

Waxa Ay Tahay Inay Waalidiinta/Masuuliyiintu Ogaadaan

Tallaalka COVID-19 waxaa heli kara dadka da'doodu tahay 6 bilood iyo wixii ka weyn.

Maxay tahay sababta carruurta loo tallaalayo?

Tan iyo billoowgii musiibada caabuqa, in ka badan 15 milyan oo caruur ah oo kunool Mareykanka ayuu ku dhacay COVID-19. Kor u kaca noocyada cusub ee caabuqa COVID-19 ayaa horseeday isbitaal dhigisti ugu sarreysay caabuqa COVID-19 ee dhallinyarada dhexdooda.

Tijaabooyin caafimaad ayaa caddeeyey in tallaalkaan uu aad ogu shaqeeyo kahortagidda COVID-19 ee dhalinyarada. Waxaa aad u yaraanaysa suurtagalnimada ah in ay si aad ah ula xanuunsadaan cudurka, isbitaal loo dhigo, ama ay u dhintaan COVID-19.

Akhri **Tusmada Ka hadalka Tallaalada** si aad u hesho tilmaamo la xariira sida dhallinyarada iyo qoysaska loogala hadlo tallaalada.

Sideen ayaan ku tallaalaa canugeyga?

Gobolka Washington waxa uu si bilaash ah ku bixiyaa dhammaan tallaalada lagu taliyey ee loogu talagalay carruurta illaa da'da 18 sano. Weydii dhakhtarka canuugaaga ama rugtaada caafimaadka joogtada ah haddii ay bixiyaan tallaalka COVID-19.

Qoysaska aanan horay ulahayn daryeel bixiye caafimaad waxa ay **Help Me Grow WA Hotline** ka wici karaan **1-800-322-2588** ama waxa ay geli karaan **ParentHelp123.org** si ay u helaan daryeel bixiye caafimaad, rug caafimaad ama ilaha kale ee caafimaadka. Adeegaan waa lacag la'aan iyo caawimaada luuqadeedna waa la heli karaa.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa **VaccineLocator.doh.wa.gov** waxaadna adeegsan kartaa habka kala shaandheynta si aad u aragto liiska goobaha kuu dhaw ee haya tallaalka carruurta.

Sidee arrintaan caawimaad u leedahay marka la joogo guriga?

Tallaalka COVID-19 ayaa ka dhawri kara ilmaha cudurka, micnaheedu waxa ay tahay isu imaatinka meelaha gudaha ay badqab u tahay in lagu martigeliyo ama ay kaqeyb galaan.

Qaadashada tallaalku waxa uu gacan kageysan doonaa badqabka carruurta waxa uuna difaacaa xubnaha katirsan qoyska ee guriga dhexdiisa.

Qoysasku waa inay sii wadaan raacidda tallaabooyinka kale ee lagu taliyey ee badqabka oo ah dhawrista ugu wanaagsan.

Imisa Cirbadood ayay tahay inay carruurtu qaataan?

Dhammaan carruurta waxaa lagula talinayaa inay qaataan ugu yaraan 2 qaadasho/kuuro oo tallaalka ah. Qaadashooyin/kuurooyin dheeraad ah ayaa lagula talin karaa si loo tixgeliyo kuwii u dambeeyey.

- Carruurta da'doodu tahay **6 bilood - 4 sano** waxay helayaan 3 qiyaasood/doos oo taxanaha tallaalka Pfizer ah ama 2 qiyaasood/doos oo taxanaha tallaalka Moderna ah
- Carruurta **da'doodu u dhaxayso 5-11** waxay helayaan 2 qiyaasood/doos oo taxanaha tallaalka aasaasiga ah
- Carruurta **da'doodu u dhaxayso 12-17** waxay helayaan 2 qiyaasood/doos oo taxanaha tallaalka aasaasiga ah

Carruurta la siiyay 2 qiyaasood/doos oo taxanaha tallaalka ah oo si dhexdhexaad ah ama si daran daciif uga ah habdhiska difaaca jirka waa inay qaataan qiyaas/doos dheeraad ah 28 maalmood ka dib marka ay qaataan tallaalkooda 2aad oo dhammaan carruurta 5+ ah waa inay qaataan qiyaas/doos xoojin ah. Kuurooyinka dheeraadka oo kooxaha kale ah ayaa laga yaabaa in lagu taliyo mustaqbalka.

Si lagaaga jawaabo su'aalahaaga:

Booqo: VaccinateWA.org/kids

Wac: 1-833-VAX-HELP (1-833-829-4357)**, Kadib Riix #**

Caawimaada luuqada ayaa la heli karaa.

Vaccinate WA

CovidVaccineWA.org

SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO EE KU SAABSAN TALLAALKA CARRUURTA EE COVID-19

Miyuu COVID-19 xaqiiqdii halis kuyahay canugeyga?

Inkasta oo tirada ilmaha ee uu ku dhacay COVID-19 ay yar yihiin marka loo barbar dhigo dadka waaweyn, caruurta:

- Waxaa ku dhici kara fayraska keena COVID-19
- Waxa ay la xanuusan karaan ama u dhiman karaan COVID-19
- Waxa ay COVID-19 u gudbin karaan dadka kale
- Waxaa kasoo gaari kara COVID-19 dhibaatooyin daran, sida “COVID oo muddo sii haya” ama xanuunka caabuqa jirka oo halis ah oo loo yaqaano Multisystem inflammatory syndrome in children (MIS-C, Cudurka caabuqa habdhisyada kaladuwan ee jirka ee carruurta)

Tallaalka ayaa la muujiyey inuu waxyeello yar kuleeyahay bulshadaan, oo uuna si fiican ooga difaaco cudurka. Faa'iidooyinka tallaalka ayaa aad ooga miisaan badan halisaha qaadista COVID-19.

Talaalku badqab ma u leeyahay ilmahayga?

Haa, tallaalka ayaa loo arkaa inuu yahay mid aad badqab ugu leh carruurta. Majirto waxyeelo kadhalata tallaalka oo lagu ogaaday tijaabooyinkii caafimaadka ee tallaalka ee lagu sameeyey dhalinyarada. Daraasadaha ayaa socda, Mareykankuna waxa uu leeyahay nidaamyo adag oo badqabka tallaalka ah si uu uqabto calaamad kasta oo digniinta hore ah.

Maxay yihiiin waxyeelooyinka kasoo gaaraya carruurta qaadashada tallaalka?

Khatarada caafimaadka ee soo gaaraya carruurta haddii uu kudhaco COVID-19 ayaa aad ooga badan halista waxyeelada kasoo gaarta qaadashada tallaalka.

Sida tallaalada kale, waxyeelooyinka ugu badan ee tallaalka waxaa ka mid ah meesha la durey oo xanuunta, daal, madax xanuun, iyo murqo xanuun. Astaamahaan badanaa waa kuwa iska fudud.

Tijaabooyinka Caafimaadka (kaliya ah Ingiriisi) carruur badan ayaa soo tabisay in saameynta ka dhalata tallaalka kadib kuurada labaad ay kabadan tahay marka loo fiiriyo kuurada koobaad. Waxyeelada kadhalata tallaalka waa mid guud ahaan udhaxeysay khafiif illaa dhex-dhexaad xagga halis ahaanta waxa ayna dhaceen labo maalmood gudahood kadib marka la qaato tallaalka, inta badana waxa ay ku baaba'een hal maalin ilaa labo maalmood gudahood.

Carruurtu maxaa ay ubaahan yihiin inay keenaan wakhtiga ballantooda?

Xaaladaha Badankooda, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ayaa ubaahnaan doona in ay siiyaan oggolaansho si loo tallaalo qofki kayar da'da 18 sano. Waa inay weydiiyaan goobta tallaalka waxa ay ooga baahan yihiin oggolaanshaha.

Rugta caafimaadka ayaa weydiin kara Kaarka Aqoonsiga canuga, ama Social Security number (Nambarka Sooshal Sakuuratiga), laakiin khasab kuguma ahan inaad siiso.

Khasab kuma aha carruurta in ay ahaadaan muwaadiniin Mareykan ah si ay u qaataan tallaalka. Goobaha tallaalku ma weydiin karaan qofka xaaladiisa soogalootiga. Xogta shakhsiyeed waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeedooyinka caafimaadka dadweynaha.

Waxaan qabaa su'aalo dheeraad ah. Xagee ka heli karaa?

Kahel jawaabaha su'aalaha dheeraadka ah halkaan **VaccinateWA.org/kids**. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka joogtada ah ee canugaada.

Washington State Department of Health

DOH 825-013 November 2022 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale ah u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov